# Xafiisyada Minnesota SBDC




## GOBOLKA MINNESOTA XAFIISKA MAAMULKA SBDC

St. Paul • 651-259-7423 • 877-653-8333

Small Business Development Centers (Xarumaha Horumarinta Meheradaha Yaryar) waxay ku yaallaan gobolka oo dhan si ay ugu adeegaan dadweynaha. La xiriir xafiiska kuugu dhow oo ka qabso ballan si aad ugala hadasho baahidaada meheradda ama booqo barta intarnetka ee www.mnsbdc.com.

POWERED BY SBA U.S. Small Business Administration

Qeyb ahaan maalgelintu waa mid lagu helo Heshiis iskaashi ah oo lala galay U.S. Small Business Administration (Maamulka Meheradaha Yaryar ee Mareykanka), Minnesota Department of Employment and Economic Development (Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Minnesota) iyo goobaha wada-shaqeynta ee taageerada gobolka. Fikradaha oo dhan, gunaanadka ama talooyinka la soo bandhigayo waa kuwa ay dad(ku) qoreen oo kama turjumayaan maalgeliyeyaasha dhaqaalaha ee barnaamijka. Barnaamijyadu waa kuwo dadweynaha oo dhan ugu furan si aan kalasoocid lahayn. Dadka naafada ah waxaa loo hayaa wixii qaabilaad macquul ah marka ay si toos ah uga soo codsadaan shaqaalaha hawsha wada ugu yaraan laba toddobaad ka hor.

Small Business Development Centers (Xarumaha Horumarinta Meheradaha Yaryar) waxa ay dadka u hayaan fursado shaqo iyo adeegyo loo siman yahay.

# MnSBDC Xarumaha Hoggaaminta iyo Gobolka

**WAQOOYI-GALBEED**
Northwest Minnesota Foundation
201 3rd Street NW
Bemidji, MN 56601
Taleefanka: 218.755.4255
nwsbdc@nwmf.org

**XARUNTA WAQOOYIGA**
Central Lakes College
501 West College Drive
Brainerd, MN 56401
Taleefanka: 218.855.8140
sbdc@clcmn.edu

**WAQOOYI-BARI**
Northland Foundation
202 W Superior Street, Suite 800
Duluth, MN 55802
Taleefanka: 218.740.7307
info@northlandsbdc.org

**XARUNTA GALBEEDKA**
Minnesota State Community and Technical College
1900 28th Avenue South
Moorhead, MN 56560
Taleefanka: 218-299-6605
SBDC@Minnesota.edu

**BARTAMAHA**
St. Cloud State University
355 5th Avenue South
St. Cloud, MN 56301
Taleefanka: 320.308.2254
klross@stcloudstate.edu

**MAGAALOOYINKA MATAANAHA IYO NAWAAXIGOODA**
University of St. Thomas
Terrence Murphy Hall 100
1000 LaSalle Avenue
Minneapolis, MN 55403
Taleefanka: 651.962.4503
smallbusiness@stthomas.edu

**KOONFUR-GALBEED**
Southwest Minnesota State University
1501 State Street
Science and Technology Building Room 201
Marshall, MN 56258
Taleefanka: 507.537.7386
sbdc@smsu.edu

**XARUNTA KOONFURTA**
Minnesota State University, Mankato
424 North Riverfront Dr, Suite 201
Mankato, MN 56001
Taleefanka: 507.389.8875
info@myminnesotabusiness.com

**KOONFUR-BARI**
Rochester Area Economic Development, Inc. (RAEDI)
221 First Avenue SW, Suite 600
6th Floor-MN BioBusiness Center
Rochester, MN 55902
Taleefanka: 507.738.1002
info@rochestersbdc.com

**XAFIISKA GOBOLKA**
(Maamul-ahaan keliya)
Minnesota Department of Employment and Economic Development - SBDC
180 East Fifth Street, Floor 12
St. Paul, MN 55101-1678
Taleefanka: 651.259.7423
deed.mnsbdc@state.mn.us

Fadlan booqo barta intarnetka ee
**www.mnsbdc.com**

Marka la soo codsado, waxaa dadka naafada ah loo hayaa qoraal ah siyaabo kale oo waa in ay soo garaacan 651-259-7423.

125 • 1-2023

# Minnesota Small Business Development Centers (Xarumaha Horumarinta Meheradaha Yaryar)

**(Minnesota Small Business Development Centers)**




AMERICA'S SBDC MINNESOTA

*Caawimaadda Bilaabista Meheradda, Kobcinta iyo Guulgaarista*

# **MINNESOTA** SMALL BUSINESS DEVELOPMENT CENTER NETWORK (DALLADDA XARUNTA HORUMARINTA MEHERADAHA YARYAR)

## Waxaan Kugu Caawin Karnaa Bilowga ama Kobcinta Meheraddaada

Meharaduhu waxay ka bilowdaan fikrado fiican iyo rabitaanka meheradlaha. Sida loogu guuleysan karo fikradaha waa marka la qabto shaqo adag, go'aamo wanaagsan iyo inta badan, hadaf lagu hubinayo in ay si fiican wax u socdaan.

> "Waxaan meheradda bilaabay 9 sano ka hor oo waxaan igu caawiyey SBDC. Sannad kasta waxaa la igu caawiyaa in aan fahmo wixii isbeddela oo ku cusub meheradda iyo dhaqaalaha. Taladoodu aad bay iigu fiicneyd oo ma awoodi karin in aan iska bixiyo taageerada aan ka helay sannadihii la soo dhaafay oo dhan."
>
> *—Lori Langerud, Macluumaadka Akhriska*

Haddii aad u baahan tahay sida fikradaha fiican loogu beddelo meherad fiican, sida loo joogteeyo macaashka meheradda aad ku jirto, ama sida heerka meheraddaada kor loogu qaado, Minnesota Small Business Development Center (MnSBDC) Network (Dalladda Xarunta Horumarinta Meheradaha Yaryar) ayaa kugu caawin doonta.

## Waxaan Hayno

Dalladda meheradaha ee MnSBDC waxay dadka u haysaa talabixin xirfadle oo ah qarsoodi, haddii ay meheraduhu cusub yihiin iyo haddii ay horay u jireen. Waxaa dadka lagala shaqeeyaa si ay u ogaadaan fursado, si ay u kordhiyaan macaashkooda, si ay u helaan xasillooni badan iyo si ay u kordhiyaan kobocooda mehadeed ee mustaqbalka.

Taageerada maaliyadeed waxay nooga timaaddaa hay'ado na taageera oo noo suurtageliya in ay dadku naga helaan adeegyo bilaash ah. Tababar aqoonkororsi ah ayaan dadka ugu haynaa si lacag la'aan ah ama lacag yar.

## Adeegyo kale

Hoos ka eego qaar ka mid ah waxyaabo muhiim ah oo ay la-taliyeyaashu dadka kala hadlaan:

- Daraasadeyn macquul ah
- Caawinta meheradda bilowga ah
- Qorsheyn ah horumarinta meheradda
- Helitaanka raasumaalka iyo meelo amaah laga helo
- Hawlaha meheradda
- Maareynta lacagta caddaanka ah iyo fahamka maaliyadda
- Nidaamyada xisaabxirka iyo xisaabinta
- Horumarinta qorshaha suuqgeynta iyo cilmibaarista suuqa
- Horumarinta barta intarnetka/warbaahinta bulshada/in wax lagu iibiyo intarnetka/SEO
- Iibsasho ama iibin meheradeed
- Qiimeynta meheradda iyo qorsheynta ficilka xiga
- Caawimaad ah waxa la dhoofinayo/ganacsiga caalamiga ah
- Caawimaad ah waxsoosaarka meheradaha liita

Ma hayno maalgelin toos ah, laakiin waxaan dadka u sheegnaa ilaha maalgelinta iyo helis ah raasumaal sida amaahda SBA, amaahda bangiyo gaar ah, amaah yar iyo raasumaal meheradeed.

Caawimaad kasta waxa loo eegaa sida ay ugu fiican tahay baahida qofka. Nala soo xiriir si aad u sameysato qorshehaaga shakhsiga ah.



## Dalladda Guud

Dalladda MnSBDC waxay leedahay sagaal xarumood oo ah kuwa goboleed iyo xafiisyo ku yaalla gobolka oo dhan sida kulleejyada, jaamacadaha iyo wakaaladaha dhaqaalaha ee deegaan kasta. La-taliyeyaasha noo jooga waa dad leh aqoon sare, khibrado ganacsi, oo intooda badan waxay bilaabeen oo ay soo maareyn jireen meherado. Waxay garanayaan caqabadaha meheradaha ee gaarka ku ah bulshada deegaanka, laakiin sidoo kale waxay dadka ku caawin karaan in ay la tartamaan suuqyada dunida.




MnSBDC waxa ay xirfadleyaal kale kala shaqeysaa horumarinta dhaqaalaha, goobaha amaahda, rugaha ganacsiga, hay'adaha aan ahayn macaashdoonka iyo hay'ado kale oo meheradaha u maalgeliya si loogu guuleysto.

> "Waxaan meheraddeyda ku soo waday si la mid ah sidii guri si aayar ah loogu dhisayo dubbe iyo kashawiito. La-taliyihii SBDC waxaan ka helay wixii aan u baahnaa si aan hawsheyda ugu xoojiyo. Si aad ah ayaan kaalmadaas uga mahadcelinayaa!"
>
> *—Diane Hovey, Alliance for Healing PA*

## Sida Aad Noola Soo Xiriireyso

Si aad faahfaahin uga hesho adeegyada iyo tababarka ay bixiso Daladda MnSBDC, la xiriir xarunta gobolka ee kuugu dhow, ama booqo barteena intarnetka, **www.mnsbdc.com**.